Wax ka badelada Xeerka 119 ee QABYO QORAALKA AH

| | |
|---|---|
| IDENT | PAS1 |
| Nooca Dhukumiintiga | Xeerka |
| Nooca La xariira | UVMHN CVMC/PMC/UVMMC |
| Jagada Mulkiilaha | Dir Patient Access |
| Jagada Sarkaalka Ansixinaaya | Ku xigeenka Fulinta Maaliyada iyo CFO |
| Taariikhda Dhaqangalka | 7/1/2024 |
| Taariikhda Dib u eegista Xigta | 7/1/2027 |

**JAGADA:** Financial Assistance Program

**UJEEDADA:**

Si loo abuuro xeer iyo habraac loogu talagalay maamulka The University of Vermont Health Network gaar ahaan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale.

**BAYAANKA XEERKA:**

University of Vermont Health Network waa urur udub dhexaad u ah bukaanka oo ay ka go'an tahay inuu dhamaan bukaanaada ula dhaqmo si siman, leh xushmad iyo sumcad ayadoon eegeyn dheefaha caymiska daryeelka bukaanka ama kheyraadka dhaqaalaha. Sidoo kale, University of Vermont Health Network waxaa ka go'an inay kaalmo dhaqaale siiso shakhsiyaadka qaba baahiyaha caafimaadka ee muhiimka ah aana lahayn caymis, caymiskiisu uusan daboolin adeegyada, u qalma barnaamijka dawlada, ama haddii kale aan awoodin inuu iska bixiyo, kharashaadka daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah ayadoo lagu saleynaayo xaalada dhaqaale ee bukaanka. Iyadoo la raacaayo hadafkeeda ah bixinta adeegyo daryeel caafimaad oo haboon, tayo sare leh, la awoodi karo iyo si aan u gudano waajibaadkeena ka ahaan urur aan macaash doon ahayn, University of Vermont Health Network waxay ku dadaalaysaa inay hubiso in awoodda dhaqaale ee dadka u baahan adeegyada daryeelka caafimaadka aysan ka hor istaagin inay ka hortagaan inay raadsadaan ama helitaan daryeel.

Kaalmada Dhaqaalaha looguma talagalin inay badel u noqoto waajibaadka shakhsi ahaanneed. Bukaanada waxaa laga filayaa inay u hogaansamaan habraacyada iskaashatada UVMHN’s Vermont si ay u helaan noocyada kale ee lacag bixinada ama kaalmada dhaqaalaha, iyo inay bixiyaan kharashka daryeelkooda ayagoo ku saleynaaya awoodooda shaqsi ee lacag bixinta. Shaqsiyaadka dhaqaale ahaan awooda inay iibsadaan caymiska caafimaadka waa in lagu dhiirigeliyo sidaas, maadaama ay arrintaas ka dhigan tahay xaqiijinta helida adeegyada daryeelka caafimaadka, iyo caafimaadkooda guud, iyo ilaalinta hantidooda shaqsi ee gaarka ah.

Si ay u maareeyso kheyraadkeeda si masuulnimo leh oo loogu ogolaado UVMHN inay bixiso kaalmada heerka ugu habboon ahan tirada ugu badan ee dadka u baahan, siyaasadaha iyo nidaamyada soo socda ayaa loo dejiyay bixinta kaalmada dhaqaale ee bukaanka.

**Xeerku wuxuu khuseeya Iskaashatadaan UVMHN ee soo socota:**

Central Vermont Medical Center
130 Fisher Road
Berlin, VT 05602

Porter Medical Center
115 Porter Drive
Middlebury, VT 05753

The University of Vermont Medical Center
111 Colchester Avenue
Burlington, VT 05401

**HABRAACYADA:**

**Kaalmada Dhaqaalaha**

**<u>U qalmida Adeegga Daryeelka Caafimaadka:</u>**

Adeegyadaan soo socda waxay u qalmaan kaalmada dhaqaalaha:

- Adeegyada caafimaadka degdega ah ee lagu bixiyay goobta qolka gurmadka ah;
- Adeegyada xaaladaha dedgega ah ee la bixiyo marka ay jirto xaalad nolasha halis gelinaysa oo lagu bixiyo qol ahayn kan xaaladaha degdega ah;

- Adeegyada degdega ah ee xaalada taas oo, haddii aan degdeg loo daawayn, keeni karta isbeddel waxyeelo wayn keenaya u keeni karta heerka caafimaadka ee shakhsiga; iyo
- Adeegyada caafimaadka ee la doorto looguna talagalay bukaanada buuxiya habraacyada barnaamijka ee degsan.

Adeegyada aan u qalmin kaalmada dhaqaalaha:

- Adeegyada Qurxinta/qaliinka balaastiga ah
- Adeegyada dhalmo la'aanta/dhalmada, tusaale ahaan, tuubada gumaarka la geliyo ee qaabilsan shaxwada, qaliinka tuubada lagu geliyo dumarka si uur u qaadaan mar labaad
- Daryeelka aan caafimaad ahaan muhiimka ahayn, oo ay kujiraan daryeelka xanaanaynta oo aanay jirin baahi isbitaal dhigid oo degdeg ah
- Adeegyada kharashkooda lagu daboolay xeerka caalamka, tusaale ahaan, qiimo dhimista horey loo sameeyay
- Adeegyada cilmi-baaritaanka/tijaabada ah
- Daryeelka bukaanada caalamiga ah/dalalka kale u dhashay ilaa in adeegga lagu bixiyay maahee qolka xaaladaha degdega ah; qofka dalka qalaad u dhashay oo lagu qeexay booqasho bukaan, qof aan deganaan deegaanka ama ka shaqayn Vermont
- Adeegyada lagu dhammaystiro Appletree Bay
- Adeegyada sida tooska ay dib lacagtooda ugu celiyaan bukaanka shirkada caymiska ama qolyo sadexaad

**Caymiska Shirkadu:** Dhammaan bixiyaasha caafimaadka ee UVMHN ee ka shaqeeya daryeelka iskaashatada UVMHN iyo xarumaha dhakhaatiirta ayaa lagu daboolay kharashkooda xeerkan. Bixiyaasha daryeelka ee kharashkooda la daboolay waxaa laga heli karaa Websaytka dadwaynaha ee UVMHN oo ay kujiraan liiskii ugu dambeeyay ee la heli karo (arag liiskaan xiriirka ee hoose). Si aad u codsato nuqulka liiskaan, oo lacag la'aan ah, fadlan la xariir Waaxdeena Adeegga Macaamiisha oo lambarkoodu yahay 802-847-8000 ama 800-639-2719.

**Isbitaalka Kharashkooda la daboolay:** Dhammaan adeegyada u qalma ee lagu bixiyo ama laga dalbado iskaashatada UVMHN iyadoo aan loo eegin heerka dhakhaatiirta shaqeeya ama kuwa aan shaqayn. Fiiro gaar ah: Arrintaan waxay khusaysaa kharashaadka isbitaalka oo keliya, eeg caymiska daryeel bixiyaha si aad u oggaato in kharashka dhakhtarka la dabooli doono iyo in kale.

**U qalmida Dhaqaalaha:** U qalmida kaalmada dhaqaalaha waxaa loo tixgalin doonaa shaqsiyaadka aan caymiska lahayn, aan caymis hoos imaan, ee aan u qalmin barnaamij kasta oo daryeelka caafimaadka dawladu ku bixiso, oo aan awoodin inay iska bixiyaan kharashka daryeelkooda, iyadoo lagu salaynaayo go'aaminta baahida dhaqaale sida waafaqsan siyaasadaan. Bixinta kaalmada waa in lagu saleeyo go'aan gaar ah oo ah go'aaminta baahida dhaqaale, waana inaan la eegin da'da, jinsiga, sinjiyada, heerka bulshada ama soo galootiga, nooca galmada qofku ka helo, aqoonsiga jinsiga ama muujinta, ama xiriirka diinta.

U qalmida kaalmada dhaqaale waxaa lagu saleeyaa tijaabada dakhliga iyo hantida.

- Tijaabada Dakhliga: Barnaamijkaan wuxuu ku kooban yahay bukaanada muujiya baahida dhaqaalaha oo ku salaysan dakhliga ama kharashaadka caafimaadkoodu ee qaab ahaan aadka u xun. Xeerarka Saboolnimada dawlada dhexe ee markii ugu dambeysay la daabacay ayaa loo isticmaali doonaa go'aaminta koowaad. Bukaanka dakhliga guud ee qoyskiisa wax laga badelay ama ka hooseeya heerka saboolnimada dawlada dhexe (FPLG) ee 400%, sida lagu qiimeeyay tirada qoyska, waxaa laga yaabaa inuu ka gudbo tijaabada dakhliga, waxaana loo tixgalinayaa kaalmo dhaqaale haddii uu sidoo kale ka gudbo tijaabada hantida.

    - Dadka ku tiiraan, ee da'doodu tahay 18 ama kasii weyn, waxaa laga yaabaa in lagu daro tirada qoyska marka in ka badan 50% ee taageerada uu bixiyo dammaanad qaaduhu. Si aad ugu qalanto kordhintaan qoyska, qofka ku tiirsan qoyska waa in canshuur celinta Dakhliga dawlada dhexe lagu qoraa inuu yahay qof ku tiirsan.
    - Shaqaalaha soogalootiga ah ee xubnaha qoyskooda ee dhaw sida (xaaska/ninka iyo carruurta dhashay) ay degan yihiin meel ka baxsan dalka ayaa lagu dari doonaa tirada qoyska.

- Tijaabada Hantida: Qof kasta/qoys kasta waxa loo ogol yahay hanti kaash ah oo le'eg heerka dakhliga 400% ee FPL, sida lagu muujiyay tirada qoyska. Haddii hantidu ay ka hooseyso heerka habraacaan, bukaanku wuxuu ka gudbi doonaa tijaabada hantida.

    - Inkastoo ay ku xiran tahay qiimaha, guryaha kirada ah ayaa laga yaabaa in laga saaro xisaabta, waase haddii dakhliga kiraynta lagu daro xisaabta dakhliga qoyska ee billaha ah.

Dhaafitaanada:

- Meesha koowaad ee uu qofku degan yahay, hantida lagu hayo koontooyinka kaydka hawlgabka ama qorshaha hawlgabka ee u dhigma ee canshuurta dib loo dhigay iyo koontooyinka kaydka kuleejka ee uu hayo bukaanku looguna talagalay bukaanka ayaa laga saaray dib u eegista hantida.
- Gunnooyinka waxbarashada iyo/ama deeqaha waxbarashada looma tixgalinaayo hanti kaash ah lagumana daraayo hantida la eegaayo.

**Shuruudaha degenaanshaha:** Bukaanadu waa inay degan yihiin gudaha aagga adeegga UVMHN ilaa in adeegyada caafimaad ay yihiin maahee kuwo degdeg ah ama caafimaad ahaan daruuri ah. Adeegyada la qorsheeyay ee bukaanada deggan meel ka baxsan aagga adeegga UVMHN uma qalmaan kaalmo dhaqaale. Kaalmada dhaqaalaha ee dadka degan meel ka baxsan aagga adeega UVMHN waxa la siin doonaa adeegyada marka ay jiraan xaalado gaar ah oo keliya iyo ogolaanshaha ku habboon. Siyaasad gooni ah ayaa la abuuray oo qeexaysa shuruudaha, habraaca, iyo oggolaanshaha looga baahan yahay dhakhaatiirta UVMHN ee doonaaya inay daryeel samafal ah ka bixiyaan UVMHN ayna siiyaan dadka degan meelaha kale. (Codsiga Bixinta Adeegyada Daryeelka Caafimaadka ee la siiyo Muwaadiniinta Ajaaniibta ah).

Dadka degan Vermont waxay ku nool yihiin Vermont, waxaana shaqaaleysiiyay shirkada Vermont katirsan si ay u bixiyaan adeegyada Vermont ama waxay dhigtaan dugsi ku yaala Vermont, ama isku darka waxyaabahaan. Shardiga waxaa ka mid ah shaqsi ku nool Vermont waqtiga adeegyada la bixiyay laakiin aan deegaanka ku lahayn guri joogto ah.

Dadka degan New York waa inay ku nool yihiin aagga adeega in ka badan 6 billood sanadkii si ay u buuxiyaan shuruudaha deganaanshaha.

Aagga adeegga waxaa lagu qeexay sida: Dhammaan Degmooyinka Vermont, Dooro Degmooyinka New York sida (Clinton, Essex, Franklin, Washington, Hamilton, Warren, iyo St. Lawrence) iyo New Hampshire si aad u hesho shaybaarka tixraaca (Degmooyinka Coos, Grafton, iyo Sullivan).

Caddaynta degenaanshaha waxaa lagu caddeyn karaa mid ka mid ah waxyaabahaan soo socda:

- Shatiga darawalnimada ee goobta adeegga, kharashaadka guriyeynta oo leh ciwaanka goobta adeega, kiraynta hantida ku taala goobta adeega ama kharashka goobta adeega, koobiga qandaraaska shaqaalaha soogalootiga ah ama warqadda shaqada ee qandaraaska ee shirkad ay bixisay.
- Warqadaha mushaarka shaqada ee Vermont, caddaynta iska diiwaan gelinta dugsiga, ama dukumiinti qoran oo kasoo baxay Ruq caafimaad oo Bilaash ah (Open Door Clinic).

**Caymiska Caafimaadka iyo Ka Masuul Noqoshada Lacag Bixinada:** Adeegyada laga bixiyo UVMHN waxaa lagu dalacayaa kharashkooda caymiska koowaad ee bukaanka, caymiska caafimaadka gaarka ah, qorshaha caafimaadka shaqada ee loo shaqeeyaha/shirkada, magdhowga shaqaalaha, ama shirkadaha bixiyaha kharashka caafimaadka/qolyaha saddexaad ee masuulka ka ah. Marka ay jiraan xaaladaha suurtagalinimada masuuliyada ka dhalata dhaawac/waxyeello baabuur ee taariikh soo socota, UVMHN waxay xerayn doontaa rahmad si ay u ilaaliso danaheeda dhaqaale, marka laga reebo dadka hela Medicare/Medicaid. Ka dib marka la xareeyo rahmada, kaalmada dhaqaale ayaa la ogolaan karaa, haddii bukaanku uu si kale ugu qalmo. Haddii uu jiro waqti mustaqbalka marka la qaybiyo lacagaha masuuliyada, rahmada UVMHN waxay u ogolaan doontaa UVMHN inay soo ceshato qayb ama dhammaan kaalmada dhaqaale ee markii hore la siiyay bukaanka.

**Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha/Shuruudaha Badelka Daryeelka Caafimaadka:** Bukaanada codsanaya barnaamijka kaalmada dhaqaale ee UVMHN waxaa dib u eegis ku sameynayaa u qalmitaankooda barnaamijyada daryeelka caafimaadka gobolka ama kan dawlada dhexe. Bukaan kasta oo loo aqoonsado inuu awood u leeyahay in la siiyo kaalmadaan waxaa lagu amri doonaa inuu codsado. Bukaanada loo aqoonsaday inay sida suurtagalka ah u qalmi karaan Medicare, Medicaid ama gunnooyinka loo maro Barnaamijka Isweydaarsiga Daryeelka Caafimaadka ee Vermont ama New York, codsiga iyo u hoggaansanaanta habraaca barnaamijkaas waa shardi horudhac u ah barnaamijka kaalmada dhaqaalaha ee UVMHN.

Dhaafitaanada:

- Bukaanka nidaamkiisa caqiidada diinta ama dhaqanka uu mamnuucaayo raadinta ama ka helista kaalmada dhaqaale hay'ad dawladeed waxaa laga yaabaa in laga saaro shuruudaha barnaamijka daryeelka caafimaadka dadweynaha. Hase yeeshee, bukaanka waxaa looga baahan doonaa inuu qaato qayb ka mid ah mas'uuliyada dhaqaalaha si ay qiimeyn ugu sameeyaan Guddiga Racfaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha.

- Diidmada soogalootiga aan sharciyada haysan inay codsadaan barnaamijyada dadweynaha ma noqon doonto sabab loogu diido kaalmada dhaqaalaha.
- Diidmada bukaanka inuu iibsado caymiska caafimaadka oo gaarka ah ma noqon doonto sabab loogu diido kaalmada dhaqaalaha.

**Go'aaminta Baahida Dhaqaalaha:** Baahida dhaqaalaha waxaa lagu go'aamin doonaa si waafaqsan habraacyada ku lugta leh qiimaynta shaqsiga oo ay ku jiraan kuwaan soo socda. Fiiro gaar ah, marka laga hadlayo samafal mala awaal ah, nidaamka codsiga meesha ayaa laga saari karaa.

- Oo uu kujiro nidaamka codsiga, oo uu bukaanka ama dammaanad qaadaha looga baahan yahay inay la shaqeeyaan oo ay u keenaan si shaqsi ah, dhaqaale iyo macluumaad kale iyo dukumiinti khuseeya go'aaminta baahida dhaqaalaha;
- Waxaa kujiri doonaa isticmaalka ilo xogeed si guud loo heli karo oo bixiya macluumaadka bukaanka ama dammaanada bukaanka awoodiisa kharash iska bixinta. UVMHN waxay xaq u leedahay inay hesho warbixinta deynta, marka ogolaansho uu bixiyo bukaanku, si loo xaqiijiyo xasilloonida dhaqaale ka hor inta aan kaalmada dhaqaalaha la oggolaan;
- Oo ay kamid yihiin dadaalada macquulka ah ee UVMHN si ay u wax uga ogaato ilo lacag bixin oo kale oo habboon iyo caymiska laga helo barnaamijyada lacag bixinta dadweynaha iyo kuwa gaarka ah, si looga caawiyo bukaanka inuu codsado barnaamijyadan;
- Tixgelinta hantida kaashka ah ee bukaanku leeyahay, iyo dhammaan kheyraadka dhaqaale ee kale ee uu heli karo bukaanka; iyo
- Oo ay kujiraan di u eegis lagu sameeyo koontooyinka UVMHN ee bukaanka ee la heli karo ee adeegyadii hore ee la bixiyay iyo taariikhda lacag bixinta bukaanka.

Waxaa la doorbidaa, laakiin aan qasab ahayn, in codsiga kaalmada dhaqaalaha iyo go'aaminta baahida dhaqaalaha ay dhacdo ka hor bixinta adeegyada. Bakaanku waa in lagu leeyahay lacag haraadi ah oo ay ka rabaan UVMHN, la filaayo in akoonka hadda ee caymisku dhaafi doono lacag ay tahay siiyo UVMHN, ama adeeg mustaqbalka loo qorsheeyay/tixraaca UVMHN oo la filayo inuu ka tago lacag haraadi ah oo lagu leeyahay bukaanka.

Codsiyada kaalmada waa in si degdeg ah loo fuliyo, UVMHN waa inay ku wargelisaa bukaanka/codsadaha go'aanka oo qoraal ah muddo 30 maalmood gudahooda marka la helo codsiga la dhammeystiray.

Waa muhiim in codsadayaashu ay u hogaansamaan baahida UVMHN si loo helo macluumaadka saxda ah ee faahfaahsan muddo macquul ah. Codsiyada macluumaadka aan la akhrin karin ama aan dhamaystirnayn waxaa loo tixgelin karaa in la diiday ama lasoo celiyay ilaa laga helayo dhammaan macluumaadka muhiimka ah. Codsiyada waa inay leeyihiin saxiixa codsadaha ama saxiixa wakiilka matalaya codsadaha (tusaale ahaan, awooda qareenka).

**U qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale ee Kumeel gaarka ah:** Waxaa jira xaalado keena in bukaanku u muuqdo inuu u qalmo caawimaad, hase yeeshee, ma jiro codsi gargaar dhaqaale oo ku jira faylka sababo la xariira inuusan haysan dukumiinti taageero ah. Badanaa waxaa jira macluumaad ku filan oo uu bixiyo bukaanku ama iyadoo loo marayo ilo kale oo bixin kara caddayn ku filan si loo siiyo bukaanka kaalmada dhaqaalaha.

U qalmida ku meelgaarka ah ayaa la go'aamin karaa iyadoo lagu salaynaayo duruufaha nololeed ee shaqsiga oo ay ku jiraan:

- U qalmitaanka barnaamijyada kaalmada gobolka ama kuwa maxalliga ah ee kale ee aan la maalgelin (tusaale ahaan, Medicaid)
- U qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP)
- Ka qaybgalka barnaamijyada Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (Women, Infants and Children programs, WIC)
- Haddii bukaanka la xiray/maxbuus lagu leeyahay lacag haraadi ah oo uusan bixin caymisku
- Haddii bukaanku yahay guri la'aan

U qalmida ku meel gaarka ah waxa lagu hagaajin doonaa wax kala iibsiga/koodhka lacag bixinta si loo hubiyo in lacagtaan laga saaray Warbixinta Kharashka Medicare.

**Muddada U qalmida Kaalmada Dhaqaalaha:** Baahida kaalmada dhaqaale waa in dib loo qiimeeyaa waqti kasta oo xigga oo la bixinaayo adeegga haddii qiimaynta dhaqaale ee ugu dambaysay la dhammeeyey in ka badan lix bilood ka hor, ama waqti kasta macluumaad dheeraad ah oo la xiriira u qalmitaanka bukaanka ee gargaarka la ogaado. Dib u qiimaynta bukaanada da'doodu ka weyn tahay 64 sano iyo dakhligoodu ka hooseeyo 400% FPLG waa in la sameeyo sannad kasta. Dib u qiimaynta

shaqaalaha UVMHN ee dakhligoodu ka hooseeyo 400% FPLG waa in la sameeyo sanad walba. Waa mas'uuliyad saaran bukaanka inuu u sheego UVMHN isbeddellada maaliyadeed inta lagu jiro muddada abaalmarinta.

**Habraacyada Kaalmada Dhaqaalaha:** Ayadoo la raacaayo baahida dhaqaalaha, adeegyada bukaanku u qalmo sida ku xusan siyaasadaan waxay heli doonaan kaalmo dhaqaale ayadoo lagu saleynaayo habraacyada saboolnimada dawlada dhexe. Cadadka lacagta kaalmada ee la siiyo bukaanka waxaa lagu saleyn doonaa heerka dakhligooda, iyo abaalmarinta la siiyana waa inay xaqiijiyaan in bukaanku uusan masuul ka ahayn bixinta lacagta lagu soo dalaco ee ka badan lacagta lagu dalaco bukaanka caymisku haysta.

**Cadadka Sida caadiga ah Lasoo dalaco (Amount Generally Billed, AGB):** Sida lagu qeexay IRS, bukaanada u qalma laguma dalici karo lacag badan marka ay helayaan daryeelka degdega ah ama daryeelka caafimaadka ee muhiimka ah marka loo eego lacagta sida caadiga ah lagu dalaco shaqsiyaadka caymiska haysta. Lacagta celceliska ee sida caadi ah lagu dalaco (AGB) bukaanada ayaa la xisaabiyaa ayadoo la adeegsanaayo "nidaamka dib u eegista." Eeg siyaasada xaddidan ee ku aadan Kharashaadka (AGB) ee habka xisaabinta iyo qiimo dhimista sanadlaha ah.

**Abaalmarinada Kaalmada:**

- Bukaanada u qalma waa inay helaan daryeel bilaash ah, qiimo dhimis 100% ah leh, marka FPLG-gooda uu ka yar yahay ama la mid yahay heerka 250% FPL.
- Bukaanada u qalma waa inay helaan qiimo dhimista ugu yaraan AGB oo lagu daray 40% qiimo dhimis dheeraad ah oo laga jaraayo lacagta hartay ee bukaanadu iska bixinayaan kadib marka tan caymiska la bixiyo.
- Bukaanka aan caymiska lahayn ee u qalma ayaa heli doona qiimo dhimista ugu yar ee AGB oo lagu daray 40% dhimis dheeraad ah marka ay lacagta iska ayagu iska bixinayaan.

**Meelmarinta Codsiga La ansixiyay:** Kadib marka la ansixiyo codsiga, deeqda bukaanka waxaa lagu dabaqayaa dhammaan lacagaha haraadiga ah ee haray (tusaale ahan, kharashka isbitaalka iyo dhakhtarka, kharashka guud ee kuwa aan caymiska lahayn iyo dheelitirka ka dib caymiska dadka caymiska haysta) waxayna kordhisaa muddada caymiska ee lixda bilood ama 12 bilood, sida kor lagu xusay marka dakhligu uu go'an yahay sanad kalaandarka. Marka muddada deeqda dhamaato, bukaanada waxaa looga baahan doonaa inay dib u codsadaan kaalmada dhaqaalaha iyadoo lagu salaynaayo xaaladdooda dhaqaale, waxaana laga yaabaa in wax laga badelo qaybta deeqda. Muddada caymiska waxaa lagu qeexaa inay tahay taariikhda oggolaanshaha la bixiyo illaa maalinta ugu dambeysa ee bisha deeqdu dhacayso.

**Dib u celinta lacagaha:** UVMHN waa inay ku xadido dhammaan kharashyada kaalmada dhaqaale ee shakhsiyaadka heerka cadadka lacagta sida caadiga ah lagu soo dalaco bukaanaka caymiska kujira. Isbitaalku wuxuu soo celin doonaa lacag kasta oo la bixiyay oo ka badan inta uu bukaanku shaqsi ahaan masuul ka yahay inuu bixiyo sida ku xusan xeerka kaalmada dhaqaalaha inta lagu jiro wakhtiga codsiga ama 240 maalmood ka hor inta aan la helin codsi dhamaystiran. Lacagaha lagu bixiyo wax ka baxsan waqtiga codsiga uma qalmi doonaan in dib loosoo celiyo.

**Awooda la'aanta Kharashaadka Caafimaadka ee Daran:** UVMHN waxay go'aamisay in gargaarka masiibada ah dib loo eegi doono heerka ku habboon ee kaalmada dhaqaalaha. Xaalada caafimaad ahaan aadka u daran, inta badan, waxa uu noqon doonaa bukaan kharashkiisa isbitaalka uu ka bato 20% dakhliga guud ee qoyska ee sanadlaha ah. Lacagta ugu badan ee bukaanku jeebka ka bixiyo waxay ka yaraan doontaa 20% dakhliga qoyska sanadkii ama $10,000.

**Rafcaanada/Dib u eegisyada Kiiska Shakhsi:** UVMHN waxay qiraysaa in duruufaha aadka u daran ay jiri karaan oo keeni kara in dakhliga shakhsiga laga yaabo inuu dhaafo xeerarka u qalmitaanka barnaamijka. Guddiga rafcaanka ayaa la iskugu yeeri doonaa marka loo baahdo si ay dib ugu eegaan kiisaska aan xaaladoodu caadi ahayn ama masiibada kujirto ee aan la kulmin habraacyada barnaamijka ee la dejiyay laakiin soo bandhigaya dhibaato aad u daran.

Kiisaska kale ee la xariira adeegyada u baahan dib u eegis loogu talagalay baahida caafimaadka waxaa loo soo bandhigi doonaa Madaxa Sare ee Caafimaadka ama qof loo xilsaaray go'aan ku saabsan baahida caafimaad ee adeegyada la bixiyo. Haddii adeegyada loo arko inay lagama maarmaan u yihiin caafimaadka oo la buuxiyo tilmaamaha u qalmitaanka kaalmada dhaqaalaha, kaalmada waa la bixin doonaa.

Bukaanada la diido codsiyadooda kaalmada dhaqaale waxay rafcaan ka qaadan karaan go'aanka diidmada. Codsiyada rafcaanka waa in loo diraa khabiirka barnaamijka kaalmada dhaqaalaha, asagoo qoraal ah, 60 maalmood gudahooda oo laga bilaabaayo maalinta la helo go'aanka diidmada waana in si cad loo caddeeyaa sababta racfaanka loo qaadanaayo. Bukaanka waxaa la ogeysiin doonaa go'aanka kama dambeysta ah.

**Muddada Ogeysiiska:** UVMHN waxay samayn doontaa dadaal macquul ah si ay u ogeysiiso bukaanka barnaamijka kaalmada dhaqaalaha. Mudadan waxay ka bilaabanaysaa taariikhda uu soo baxay bayaanka kharashaadka ee lacagta ka hartay daryeelka bukaanka waxayna dhamaanaysaa 120 maalmood ka dib. Sida lagu qeexay xeerkaan, habab badan oo ogeysiis ah ayaa la sameeyaa laga bilaabo daryeelka hordhaca ah, inta lagu jiro daryeelka iyo inta lagu jiro guud ahaan mudada wareegga kharashka ee 120-maalmood.

**Mudada Codsiga:** UVMHN waxay ka shaqeyn doontaa codsiyada ay soo gudbiyaan shaqsiyaadka muddada codsiga, oo bilaabanaysa taariikhda uu soo baxay bayaanka kharashaadka ee lacagta ka hartay daryeelka bukaanka waxayna dhamaanaysaa 240 maalmood ka dib. Haddii dhamaadka 120-ka maalmood ee muddada ogeysiinta akoonka loo gudbiyay hay'ad dayn uruurin kadibna codsi la helo lana oggolaado 240-ka maalmood gudahooda muddada codsiga, amoonada waa in dib looga soo celiya hay'adda oo lagu meelmariyo barnaamijka kaalmada dhaqaalaha.

**Dadaalada Macquulka ah:** Dadaalada macquulka ah ayaa la sameyn doonaa si loo ogaado in bukaanku u qalmo kaalmo dhaqaale kahor inta aan lacagta baaqiga ah loo wareejin hay'ad lacag aruurin. Dadaalada macquulka ah waxaa kujira qiimeynta ku meel gaarka ah, ogeysiis iyo fulinta codsiyada iyo ogeysiis kahor, inta lagu jiro iyo kadib daryeelka.

- UVMHN ma bilaabi doonto wax tallaabo lacag aruurin oo aan caadi ahayn (ECA)
- Codsiyada aan dhamaystirnayn waa in lala eego ogeysiiska bukaanka siinaya tilmaamo ku saabsan sida ku habboon ee loo buuxinayo codsiga iyo/ama wixii dukumiinti dheeraad ah loo baahan yahay, oo ay la socoto muddada 30-maalmood ah si looga jawaabo codsiga UVMHN
- UVMHN waxay bilaabi doonaa fulinta codsiyada lasoo buuxiyay inta lagu jiro 30 maalmood gudahood kadib risiitka

**Iskaashatada University of Vermont Health Network:** Bukaanadu waxay u soo gudbin karaan hal codsi oo gargaar ah iskaashade kasta oo katirsan UVMHN Vermont sida ku xusan xeerkan. Iyadoo lagu saleysanaayo kala duwanaanshiyaha sharciga gobolka, codsiyo gaar ah waa in loo soo saaraa iskaashatada UVMHN New York. Iskaashade kasta wuxuu ku siin doonaa caawimaada heerka habboon deeqda FPLG ee loo dejiyay hay'ad gaar ah, iyadoo lagu salaynaayo xisaabinta AGB ee gaarka ah ee ururka. Dhukumiintiga taageeraya codsiga waxa hayn doona ururka ka eegaya codsigta, hase yeeshee, waxa sidoo kale heli doona ururka iskaashada ay yihiin haddii loo baahdo si loo fududeeyo hawlaha hanti dhawrka.

**La xiriiritaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha ee Bukaanka iyo Dadweynaha:** Ogaysiiska ku saabsan kaalmada dhaqaalaha waxaa laga heli karaa UVMHN, waa inuu leeyahay lambarka xiriirka, waana inay u faafiso UVMHN siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobneyn:

- Tixraaca barnaamijka kaalmada dhaqaale ee lagu daabacay bayaanka bukaan kasta.
- Ku dhajinta ogaysiisyada qolalka xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka, waaxaha iyo meelaha iska diiwaangeliyo, iyo xafiisyada adeegyada dhaqaalaha ee bukaanka ee ku yaala xarumaha kaambaaska; bandhigyo muuqda ayaa laga heli karaa waaxaha diiwaangelinta iyo xaaladaha degdegga ah ee waawayn.
- Bixinta nuqulka xog kooban oo ku qoran luuqad cad kuna saabsan sababta la iskaga diiwaangelinaayo xarunta kaambaaska iyo ka helida xogta kooban xarumaha caafimaadka ee gaarka ah. Bixinta nuqulada xeerka iyo codsiga marka la codsado.
- Bukaan jiifka, kormeeritaanka iyo joogitaanka gaaban ee bukaanada, nuqulka hagaha bukaan jiifka ayaa la bixin doonaa, kaasoo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan barnaamijka kaalmada dhaqaalaha.
- Macluumaadka waa in laga heli karo Websaytka UVMHN, oo ay ku jiraan siyaasadaha, xog kooban oo ku qoran luuqada cad, codsiga, Su'aalaha Badanaa la iswaydiiyo (FAQ) tilmaamaha FPLG iyo macluumaadka xiriirka ee dabagalka kaalmada.
- U gudbinta bukaanada kaalmada dhaqaale waxaa samayn kara xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha UVMHN ama shaqaalaha caafimaadka, oo ay ku jiraan dhakhaatiirta, kalkaaliyaasha caafimaadka, la-taliyaasha dhaqaalaha, shaqaalaha bulshada, maareeyaasha kiisaska, wadaadada, iyo ka faale-pqaadayaasha diinta. Codsiga kaalmada dhaqaale waxaa laga yaabaa inuu soo gudbiyo bukaanku ama xubin qoyska ka tirsan, saaxiibka dhow, ama saaxiibka bukaanka, iyadoo la raacayo sharciyada sirta ah ee khuseeya.
- Turjumaada shaqsiyaadka heeerka aqoonta Ingiriiskooda uusan sareyn ayaa la siin doonaa dadka ka badan >1,000 qof ama 5% bulshada aagga adeega degan. Intaa waxaa sii dheer, tarjumaadaha Iskaashatada UVMHN Vermont waa in laga helo 13 luuqadood ee ugu sarreeya ee uu aqoonsan yahay Xafiiska Vermont ee Sinaanta Jinsiga 2023 Warbixinta Helitaanka Luuqadda. Turjumaado qoraal ah ayaa laga heli karaa webseedkeena dadweynaha ama marka laga codsado goob kasta oo diiwaan gelinta ah. Turjumaada afka ayaa la heli karaa iyadoo lala xiriirinayo Waaxda Adeegga Macmiilka iyo/ama marka lala kulmo u doodaha dhaqaalaha ee xarunta isbitaalka weyn. Xogta xiriirka ee hoos ka muuqata.

Wax ka badelada Xeerka 119 ee QABYO QORAALKA AH

- Bukaanada codsanaaya nuqul turjuman iyo/ama in laga caawiyo buuxinta codsiga waxaa caawin doonaa u doodayaasha dhaqaalaha iyo/ama wakiilaada adeegyada macmiilka, oo hubin doona helida adeegyada turjumaanka ee habboon.
- Macluumaadka, kaararka xogta kooban iyo waraaqaha ayaa laga heli karaa xafiiska horumarinta caafimaadka bulshada, oo ah goob shaqaaluhu si joogto ah ugu xiran yihiin maadaam ay yihiin xarumaha bulshada looguna doodo faafinta macluumaadka iyo barnaamijyada ay heli karaan dadweynaha.
- Xeerarka, codsiyada, liisaska bixiyaasha iyo nuqullo kooban oo luuqad cad ku qoran ayaa la heli karaa, ayadoo lacag la'aan ah, oonleenka, ama waxaa si toos ah looga heli karaa goobaha xiriirka ee hoos ku qoran.

**<u>Sida Loo Codsado Kaalmada Dhaqaalaha:</u>** Bukaanada codsanaaya kaalmada dhaqaale waa inay buuxiyaan oo ayna soo gudbiyaan foom codsi, oo ay ku jiraan dhammaan dukumiintiyada loo baahan yahay. Hoos ka eeg macluumaadka xiriirka.

**<u>Soo koobida Macluumaadka Xiriirka ee Barnaamijka:</u>** Xeerarka, codsiyada, liisaska bixiyaasha, soo koobid ku qoran luuqada cad iyo caawinta qof ahaaneed ayaa lagu bixiyaa lacag la'aan waxaana lagu heli karaa iyada oo loo marayo:

- University of Vermont Medical Center
  - Websaytka: http://uvmhealth.org/medcenter
  - Adeega Macaamiilka: (802) 847-8000 ama (800) 639-2719
  - Qareenka Dhaqaalaha: (802) 847-1122 ama caawimaada toos ah, UVMMC, 111 Colchester Avenue, Burlington, VT 05401
  - Ciwaanka Boostada:
    UVMMC Patient Access Department
    40 IDX Drive, Bldg. 200-22052
    111 Colchester Avenue, Burlington, VT 05401
  - Health Assistance Program: (802) 847-6984 ama lambarka bilaashka ah (888) 739-5183
  - Fakiska: (802) 847-9332
  - Miisaska la iska diiwaangeliyo ee goob kasta
  - Liiska Caymiska Bixiyaha: https://www.uvmhealth.org/medcenter/patients-and-visitors/billing-insurance-and-registration/financial-assistance
- Porter Medical Center:
  - Websaytka: http://www.portermedical.org
  - Adeega Macaamiilka: (802) 847-8000 ama (800) 639-2719
  - Bukaanadu waxay wici karaan (802) 388-8808 dookha 5 aad, Isniinta ilaa Jimcaha, 7:30 am – 4:00 pm
  - U doodista Dhaqaalaha oo laga helo 23 Pond Lane, Middlebury VT 05753
  - Ciwaanka Boostada:
    PMC Patient Financial Services
    115 Porter Drive
    Middlebury VT, 05753
  - Miisaska la iska diiwaangeliyo ee goob kasta
  - Liiska Caymiska Bixiyaha: http://www.portermedical.org
- Central Vermont Medical Center:
  - Adeega Macaamiilka: (802) 847-8000 ama (800) 639-2719 ama (802) 371-4600 dookha 1 aad, dookha 1 aad
  - Qareenka Dhaqaalaha: 3 Home Farm Way, Montpelier, VT 05602
  - Ciwaanka Boostada:
    PO Box 547
    Barre, VT 05641
    Patient Financial Assistance Program
  - Websaytka: https://www.cvmc.org/patients-visitors/patient-financial-services/financial-assistance
  - Miisaska la iska diiwaangeliyo ee goob kasta
  - Liiska Caymiska Bixiyaha: https://www.cvmc.org/patients-visitors/patient-financial-services/financial-assistance

**<u>Xiriirka kala dhaxeeya Xeerka Laca Qaaditaanka:</u>** Maamulka UVMHN waa inuu horumariyo siyaasadaha iyo habraacyada dhaqamada lacag uruurinta gudaha iyo dibadda taas oo tixgalinaysa ilaa heerka uu bukaanku u qalmo kaalmada dhaqaalaha, dedaalka daacadda ah ee bukaanka si uu u codsado barnaamij dawladeed ama kaalmo lacageed uga codsado UVMHN, iyo dadaalka habboon ee bukaanka si uu ugu hoggaansamo heshiisyadiisa lacag bixinta ee UVMHN. Bukaanada u qalma kaalmada dhaqaalaha una hogaansamaaya dadaalka wanaagsan ee lagu xallinaayo kharashaadka isbitaalka, UVMHN waxay u balaaran kartaa qorshooyinka lacag bixinta bukaanada u qalma.

Wax ka badelada Xeerka 119 ee QABYO QORAALKA AH

Fiiro gaar ah: UVMHN ma sameyn doonto wax tallaabo lacag aruurin oo aan caadi ahayn (ECA). ECA waxaa lagu qeexaa ka iibinta deynta shaqsiga qolo kale, ka warbixinta macluumaadka xun ee shaqsiga lana wadaagista wakaaladaha warbixinta deymaha ama xafiisyada deymaha, dib u dhigista, diidmada ama baahida u qabista lacag bixinta ka hor inta aan la bixin daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah sababo la xariira bixinta shakhsi hal ama ka badan kharashaadka daryeelka hore ee FAP, iyo/ama ficilada u baahan hab sharci ama garsoor. Nuqul ka mid ah siyaasada UVMHN ee Deynta iyo Lacag aruurinta waxaa laga yaabaa in la helo iyadoo lala xiriirinayo Waaxda Adeegga Macmiilka lambarkoodu yahay (802) 847-8000 ama (800) 639-2719. Nuqul ayaa sidoo kale laga heli karaa xafiiska diiwaangelinta ee UVMHN.

**<u>Haynta Xogta sirta ah/Dhukumiintiga:</u>** Dhammaan macluumaadka la xariira codsiyada kaalmada dhaqaalaha waxay noqon doonaan kuwo qarsoodi ah. Codsiyada kaalmada dhaqaale iyo dukumiintiyada taageeraya codsiga waxa la hayn doonaa todobo sano oo laga bilaabaayo taariikhda la ansixiyay ama diidmada si loogu oggolaado soo celinta iyo dib u eegista iyo xisaab xirka xiga.

**<u>Heerarka Maamulka Wax ka badelka Kaalmada Dhaqaalaha:</u>** Heerarka oggolaanshaha soo socda ayaa la raaci doonaa ka hor inta aan kharashka laga badelin koontada bukaanka sida ku xusan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha ee Bukaanka:

| | |
|---|---|
| $1 - $20,000 | Khabiirka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha |
| $20,001 - $50,000 | Maamulaha |
| $50,001 - $150,000 | Agaasimaha |
| >$150,001 | CFO |
| Racfaanada Guddiga | CFO |

**<u>Shuruudaha Xeerka:</u>** Marka la fulinaayo xeerkaan, maamulka iyo xarumaha UVMHN waa inay u hoggaansamaan dhammaan sharciyada dawlada dhexe, gobolka, iyo kuwa deegaanka, xeerar, iyo siyaasada laga yaabo in lagu dabaqo hawlaha la raacayo siyaasadaan.

**<u>Haynta Dhukumiintiga:</u>** Codsiyada la dhamaystiray ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha waa la iskaan gareyn doonaa waxaana lagu hayn doonaa diiwaanka caafimaadka elektarooniga ah ugu yaraan muddo toddobo sano ah oo laga bilaabaayo taariikhda codsiga la ogolaaday ama la diiday.

**<u>Qorshaha Kormeeritaanka:</u>** U hogaansanaanta siyaasadaan waxaa lagula socon doonaa dib u eegis sannadlaha ah ee codsiyada Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha iyo go'aamada deeqda/diidmada. Waxaa la sameyn doonaa saddexdii billoodba mar xisaabin, iyo warbixinta bilaha ah ee natiijooyinkana dib ayaa loo eegi doonaa.

**<u>Qeexitaano:</u>** Ujeedada xeerkan, shuruudaha hoos ku qoran waxaa lagu qeexay sida soo socota:

- **AGB:** Lacagta Guud ee Lagu dalaco caymiska bixinaya lacagta adeegyada la bixiyo. Habka dib u eegistu waxa loo isticmaalaa in lagu xisaabiyo AGB, taasoo ka tarjumaysa isku darka sheegashooyinka gunnada ee Medicare ee adeegga, Medicare Advantage, Medicaid, iyo dhammaan qorshooyinka daryeelka caafimaadka gaarka ah, oo ay ku jiraan qaybaha ay bixiyaan ka faa'iideystayaasha.
- **Hantida (Lacag Cadaan ah):** Lacagta cadaanka ah, jeeda iyo haraadiga akoonka kaydka, suuqyada lacagta, shahaadooyinka dhigaalada, gunnad bixinta, kaydka, saamiyada, maalgelinta wadaagga ah, guryaha labaad, iyo guryaha kirada ah (haddii aan dakhliga kiraynta lagu darin dakhliga qoyska).
- **Deynta Xun:** Kharashyada lagu leeyahay bukaanka ee ku salaysan macluumaadka maaliyadeed ee la heli karo, waxay u muuqdaan inay leeyihiin ilo dhaqaale si ay u bixiyaan adeegyada daryeelka caafimaadka ee la soo dalacday, laakiin muujiyay ficilladooda rabitaan la'aanta si loo xalliyo kharashka.
- **Qoyska:** Iyadoo la isticmaalaayo qeexitaanka Xafiiska Tirakoobka, koox ka kooban laba ama in ka badan oo dad ah oo wada degan oo uu ka dhaxeeyo xiriir dhalasho, guur, qaraabanimo, ama korsasho sharci ah.
- **Kharashaadka Guud:** Lacagta guud kharashyada qiimayaasha buuxa ka hor inta aan la jarin wax lacag ah.
- **Dakhliga Qoyska:** Dakhliga waxaa la xisaabiuaa iyadoo la raacaayo hababka dhaqaale ee go'aaminta u qalmitaanka dhibcaha cashuurta, tusaale ahaan, MAGI (dakhliga guud ee la hagaajiyay waxna laga badelay).
  - Waxaa dakhliga kamid ah, gunada shaqo la'aanta, badqabka bulshada, hawlgabka ama dakhliga hawlgabka, lacagta dulsaarka ah, saami qaybsiga, kirada, gunnada daacadnimada, dakhliga ka soo gala hantida, koontooyinka ammaanada, iyo ilo kale oo kala duwan
  - Waxaan dakhliga ku jirin tabarucaadka cashuurta ka hor sida kuwa daryeelka ilmaha, safarka, caymiska caafimaadka ee loo shaqeeyaha kafaalo qaado, koontooyinka kharashaadka iyo qorshayaasha hawlgabka sida 401K iyo 403b

  - Waxaa laga reebay dheefaha aan lacagta caddaanka ah ahayn (sida dheefaha SNAP iyo kaalmada guryaha)
  - Lagu go'aamiyay cashuurta kahor (dakhliga guud)
  - Waxaa lagga reebay qadarka ku kordha ama hoos uga dhaca raasumaalka
  - Haddii qof uu la nool yahay qoys/lammaane, waxaa ku jira dakhliga dhammaan xubnaha qoyska (lammaanaha aan guri kuwada noolahayn ama saaxiibada guriga ku nool lama tirin)
- **Tirada Qoyska:** Bukaanka, lamaanaha, caruurta, lamaanaha guriga, iyo shakhsi kasta oo loo arko inuu ku tiirsan yihiin midkood lamaane marka la eego canshuur celinta dawlada dhexe, waa in loo tixgeliyaa inuu yahay xubin katirsan qoyska. Lamaanaha guriga waxaa lagu qeexaa dad aan qaraabo ahayn/aan isqabin oo kuwa nool guri kana go'an tahay, ka dhaxeeyo xiriir hoose oo aan sharci ahayn laguna qeexin guur.
  - Qoyska kamid ma ahan shakhsiyaadka kunool meelo kaladuwan oo isfuray, mana la eego qaabka ay u buuxiyaan canshuurta dawlada dhexe. Kuwaan waa xubno qoys oo kale.
  - Caruurta hoos timaada heshiiska daryeelka la wadaago; Labada waalidba waa loo ogol yahay inay sheegan karaan ku tiirsanaanta ilmaha, waase haddii nuqul ka mid ah heshiiska daryeelka uu muujinayo taageero maaliyadeed oo siman inay bixiyaan.
  - Waxaa ku jira carruurta qaangaarka ah ee la sheegay inay ku tiirsan yihiin canshuur celinta dakhliga dawlada dhexe ee waalidiinta.
  - Shaqaalaha soogalootiga ah, xubnaha qoyska ee tooska ah, (xaaska/ninka iyo caruurta dhashay) ay degan meel ka baxsan dalka ayaa lagu dari doonaa tirada qoyska.
- **Cadeynta Dakhliga: Waxaa kamid noqon kara laakiin aan ku koobneyn:**
  - Nuqulka canshuur celintii ugu dambeysay
  - Nuqulada bayaanka baanka ee ugu dambeeyay (akoonka kaydka, lacagta kaashka ah, lacagta suuqa, iwm.)
  - Bayaanka lacagta laga helo Xafiiska Sooshal Sukuuratiga (Social Security) (800-772-1213)
  - Nuqulada labo kamid ah jeegaga mushaarkii ugu dambeeyay ama xaashida mushaarka sanadkii ugu dambeeyay
  - Bayaanka lacagta shaqsiyaadka sida iskood ah u shaqeysta
  - Nuqulka gunnooyinka shaqo la'aanta, haddii ay khuseyso
  - Koontooyinka maalgelinta, haddii ay khuseyso
  - Dakhliga kirada, haddii lagu daray dakhliga iyo hantida
  - Caddeyn dakhli oo qoran oo kasoo baxday loo shaqeeyo (haddii lacagta kaash lagu bixiyo)
  - Warbixinadii u dambeeyay ee ka soo baxay hay'ad maaliyadeed ama qolo saddexaad oo xaqiijinaya qiimaha hantida, iyo/ama caddaynta in dhammaan bixiyaasha dhinac saddexaad ee suurtagalka ah lama wada isticmaalay, iyo in lacagta haraadiga ah lagu leeyahay dhinaca masuulka ah
  - Qandaraas ama cadeyn qoraal ah oo muujinaysa qandaraaska shaqaalaha soog alootiga ah
  - Dhukumiinti qoran oo ka socda Rugta Caafimaadka Gaarka ah (Open Door Clinic) oo ku saabsan macluumaadka maaliyadeed waa la aqbali doonaa waxayna noqonaysaa badelka caddaynta dakhliga kore. Haddii uusan u qalmin barnaamijka dawladd, nuqul warqad ama ogaysiis laga helay xafiiska dawladda oo cadaynaya u qalmi la'aanta ayaa muhiim ah
- **Caalami/Wadan Ajanabi ah:** Waa muwaadiniinta aan Mareykanka u dhalan oo Mareykanka ku jooga fiisaha socdaalka/booqashada.
- **Aagga Adeegga University of Vermont Health Network:** Vermont, dooro Degmooyinka New York (Clinton, Essex, Franklin, Washington, Hamilton, Warren, iyo St. Lawrence) oo sidoo kale dooro Degmooyinka New Hampshire (Coos, Grafton, iyo Sullivan) si aad ugu xulato adeegyada.
- **LEP/Turjumaad:** Aqoonta Ingiriisiga ee kooban oo u baahan nuqulo la turjumay oo la xariira siyaasadaha, codsiga, soo koobida ku qoran luuqadda cad iyo codsiga.
- **Awooda la'aanta bixinta Kharashaadka Caafimaadka:** Waxa jira xaalado marar ay shaqsiyaadku aanay dhaqaale ahaan awoodi karin inay helaan daryeel caafimaad oo ku filan iyaga oo aan naftooda iyo dadka ku tiirsanba ka joojin cunto, dhar, hoy, iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka u ah nolosha. Bukaanka guud ahaan waxaa loo tixgalinayaa mid aan iska bixin lkarin kharashka caafimaadka haddii lacagta haraadiga ah ee kharashaadka isbitaalku uu ka badan yahay 20% dakhliga guud ee qoyska ee sanadlaha ah, iyo asaga ama ayada aysan awoodin inuu bixiyo dhammaan ama qayb kamid ah baaqiga kharashaadka oo ka dhashay xanuun ama dhaawac aad u xun.
- **Adeegyada Daryeelka Caafimaad ee lagama maarmaanka ah:** Adeegyada daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan baaritaanka cudurka, adeegyada ka hortagga, iyo daryeelka kadib, kuwaas oo ku habboon ogaanshaha ama xaaladda bukaanka marka loo eego nooca xaaladiisa, cadadka, inta jeer, heerka, goobta, iyo mudada. Daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waa: (A) in lasoo bandhigo cadaymaha caafimaadka ama sayniska ee guud ahaan la aqbalay oo ay la socdaan cabbirrada dhaqanka guud ee la aqbalay sida ay aqoonsadeen dhakhaatiirya daryeelka caafimaadka isla takhasusyada sida caadiga ah bixiya nidaamka ama daaweynta, ama la baaro ama maareeya xaalada caafimaadka; (B) in lasoo bandhigo baahiyaha gaarka ah ee bukaan kasta iyo xaalad kasta oo muujinaysa xaalad; iyo (C) la buuxiyo hal ama in ka badan oo kamid ah shuruudaha soo socda: (i) ka caawinta dib soo celinta ama ilaalinta caafimaadka bukaanka;

(ii) ka hortagga kasii darista ama si xumaanta xaaladda bukaanka; ama (iii) ka hortagga suurtogalnimada macquulka ah ee bilaabashada dhibaatada caafimaadka ama oggaanshaha bilaabashada xaalad dhibaato ah.

- **Bayaanka Bukaanka:** Waa xog kooban oo ku saabsan akoonka bukaanka oo bille ah oo boosto loogu diro bukaanka ayadoo la adeegsanaayo ciwaanka gurigooda ee lagu sheegay oo ay ku qoran yihiin cadadka lacagta laga rabo bukaanka si uu u helo adeegyada daryeelka bukaanka ee ay bixiso UVMHN.
- **Deegaanka Guryaha:** Waa aagga koowaad ee uu bukaanku degan yahay, ha ahaato mid keligiis degan ama mid la wadaago.
- **Koodhka Lacagta/Lacag bixinta:** Waa wax kala iibsi gaarka ah ee loo isticmaalo in lagu duubo qiimo dhimista bukaanka aan caymiska lahayn.
- **Aan caymis lahayn:** Bukaanku ma laha heer caymis ama kaalmo dhinac saddexaad uu ka helo si ay uga caawiyaan buuxinta waajibaadka lacag bixinta. Bukaanka aan caymiska lahayn uma qalmo barnaamij kasta oo daryeel caafimaad dawladeed sida (Medicare, Medicaid, Qorshayaasha isweydaarsiga Caafimaadka Vermont, iwm.) inta lagu jiro taariikhaha adeegga ay bixiso UVMHN.
- **Aan haysan Caymis ku filan Lahayn:** Bukaanku wuxuu haystaa xoogaa caymis ah ama kaalmo dhinac saddexaad uu ka helo laakiin wali waxaa jira kharashyo jeebkiisa ka baxa oo ka sarreeya awoodiisa dhaqaale.
- **University of Vermont Health Network - Vermont:** Waxaa ku jira University of Vermont Health Network, Central Vermont Medical Center, Porter Medical Center, iyo Central Vermont Medical Center.
- **Deegaanka Vermont:** Shakhsi, iyadoo aan la eegeyn dalka uu u dhashay oo ay kujiraan soo galootiga aan sharciga lahayn, ee deggan Vermont, ayna shaqo siiso Vermont si uu u bixiyo adeegyada loo shaqeeyaha ee Vermont, ama u dhigto dugsiga Vermont, ama isku darka labadaba. Shardiga waxaa ka mid ah shaqsi ku nool Vermont waqtiga adeegyada la bixiyay laakiin aan deegaanka ku lahayn guri joogto ah. Midan kuma jiraan dadka soo booqanaya deegaanka ama dadka ajanabiga ah ee booqashada ku imaanaya.

**XEERARKA LA XARIIRA:**

| | |
|---|---|
| PAS35 | Xadidaada Kharashaadka (AGB) |
| EXEC11 | Codsiyada Bixinta Adeegyada Daryeelka Caafimaadka ee la siiyo bukaanada Ajaaniibta ah |
| RISK4 | Qiimaynta Caafimaadka iyo Dejinta Xaalada |
| UVMHN_CUST1 | Dhibcaha iyo Lacaga Aruurinta |

**TIXRAACYADA:**
IRC §501®(4):
IRC §501®(5):
IRC §501®(6):
H.287 (Xeerka 119)
26 C.F.R. §1.36B-2
VT Xeerka 18, Farqada 221, Farqo Hoosaadka 10:
§9481 Qeexitaanada
§9482 xeerarka kaalmada dhaqaalaha ee loogu talagalay xarumaha daryeelka caafimaadka bixiya ee waawayn
§9483 Meelmarinta xeerka kaalmada dhaqaalaha
§9484 Xogta iyo waxbarashada dadwaynaha
§9485 Mamnuucida iibinta rahmada caafimaadka
§9486 Mamnuucida xuquuqaha dhaafitaanka
§9487 Meelmarinta

**DIB U EEGAYAASHA:**

Scott Comeau, CFO PMC/ECH
Kimberly Patnaude, CFO CVMC
Judy Peek-Lee, CFO UVMMC
Michael Barewicz, Nidaamka Wareega Dakhliga UVMHN VP
Melissa Laurie, Kormeera Shirkada UVMHN VT
Isabelle Desjardins, Madaxa Sar ee Caafimaadka, UVMMC
Jennifer Parks, Madaxa Asturnaanta Xogta/Hogaansanaanta Shuruucda UVMHN
Richard Schmidgall, Agaasimaha Gudaha ee qaabilsan Xisaab xirka UVMHN
Erika Smart, Agaasimaha Maareynta Khatarta UVMHN

Wax ka badelada Xeerka 119 ee QABYO QORAALKA AH

Jason Williams, Dawlada iyo Xiriirada Bulshada UVMHN VP
Lindsay Morse, Ku xigeenka Maamulka Daryeelka VP ee UVMHN
Carol Muzzy, UVMHN AVP, Madaxa Sare ee Shuruucda, Arrimaha Shahaado bixinta iyo U Oggaansanaanta shuruucda
Gina Slobodzian, Agaasimaha Adeegga Macmiilka UVMHN
Louise Barrow, Agaasimaha Bukaanka iyo Waayo aragnimada Qoyska, UVMMC
Chris Cook, Agaasimaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ee, PMC
Nicholas Ferron, Agaasimaha Shabakada U hogaansanaanta Canshuurta iyo Istaariijiyada

**MULKIILAHA:** Shannon Lonergan, Ogolaanshaha Agaasimaha Xogta Bukaanka

**SARKAALADA ANSIXINAYA:** Rick Vincent, Guddoomiye ku xigeenka Fulinta Maaliyadda iyo CFO ee UVMHN

Wax ka badelada Xeerka 119 ee QABYO QORAALKA AH